



Abaalmarinada & Isa sharfidda: Daabacaadaha Dugsiga Sare ee Lincoln, mashaariicda maalgelinta daymeed oo ku guuleystay abaalmarino; dhammaan PIL oo lagu dhawaaqay

Laba daabacadoo oo ay soo saareen ardayda Dugsiga Sare ee Lincoln ayaa abaalmarino ku helay dhacdadii [Maalinta Warbaahinta ee Dayrta](#) ee ay martigeliyeen Jaamacadda Oregon iyo Saxaafadda Scholastic.

Wargeyska Cardinal Times ayaa la siiyay kaalinta koowaad ee Bandhiga ugu Wanaagsan “Best of Show” ee liiska loogu talagalay wargeysyada dugsiga sare. Soo gelayaasha waxaa laga codsaday in ay soo gudbiyaan nuqulka daabacaadoodii ugu wanaagsanayd 12 bilood ee la soo dhaafay, oo ay la socdaan daabacaadihii la soo saaray iyaga oo la qiimeynayo waxa ay ka hadlayaan, qoraalka, muuqaalada iyo qaabka ay leeyihiin.

Wargeyska Cardinal Times daabacaadiisii guusha soo hoysay waxay ahayd daabacadii Abriil taasi oo lagu soo bandhigay sheeko uu qoray Jamie Bikales, oo wadatay warbixin dheeraad ah oo uu qoray Sagarika Ramachandran, oo cinwaankeedu ahaa Lagu Xadgudbay isla markaaba Cabsi hayso "Abused and Afraid." ([Akhri sheekada](#))

Daabacaadu waxay sidoo kale wadatay laba sheeko oo uu qoray Sage Taylor iyo sheekooyin ay lahaayeen Scotty Martin, Gretchen Rudolph, Armand Yazdani, Oscar Harold, Jack Forman iyo Reese Nelson. Ramachandran wuxuu u shaqeeyaa isaga oo ah tafaitiraha guud ee wargeyska Cardinal Times, iyo Mary Rechner oo ah la taliyaha shaqaalaha.

Daabacaad kale oo ay soo saartay Lincoln, oo lagu magacaabo Beyond the Flock, ayaa gashay kaalinta saddexaad taasi oo loogu talagalay wargeysyada dugsiga sare. Emily Hensley waa la taliyaha loogu talagalay sheekada Beyond the Flock.

Mashaariicda maalgelinta daymeed oo la maamuusay: Laba mashaariicda dib u cusboonaynsiinta oo lagu maalgeliyay maalgelinta daymeed ee 2012 ayaa loo aqoonsaday naqshad sameynta wanaagsan. Dugsiga Sare ee Roosevelt ayaa ku guuleystay [Abaalmarinta DeMuro ee 2018](#), oo ah maamuus qaran oo lagu aqoonsado mashaariicda dhaqan-celineed ee taariikhiga ah ee wanaagsan isla markaana awooda u leh in ay buuxiyaan horumarka. Intaasi waxaa dheer, in Roosevelt ay heshay magacaabista sharafta leh taasi oo ah Abaalmarinada Waxqabadka Dhanka Dhismaha ee Shirkadda Tamarta ee Oregon.

Dugsiga Sare ee Franklin [ayaa galay kaalinta saddexaad](#) taasi oo ah qaybta Mashaariicda u Sareysa ee dhanka Waxbarashada ee abaalmarinada sanadlaha ee Joornaalka Maalinlaha ah ee Ganacsiga ee Oregon. Roosevelt iyo Dugsiga Faubion PK-8, kaasi oo sidoo kale dib loo dhisay isaga oo qayb ka ahaa maalgelinta daymeed 2012, ayaa sidoo kale u soo baxay kaalin u dambeysa ee qaybtan.

Abaalmarina kubadda cagta: Lincoln iyo Roosevelt ayaa qaatay abaalmarinada u sareeyay ee dhanka dhammaan Naadiga Dugsiyada Ka Dhexeeya ee Portland ee kubadda cagta. Ardayga ciyaartoyga ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta Lincoln ee ka ciyaara dhanka weerarka Nick Ostmo ayaa loo coddeeyay in uu yahay Ciyaaryahanka Sanadka ee Dhanka Weerarka iyada oo ciyaartoyga dhanka difaaca ee dhigta Roosevelt ee Tim Price Jr oo loo xushay in uu yahay Ciyaaryahanka Sanadka ee Dhanka Difaaca iyada oo lagu go'aamiyay cod bixin ay sameeyeen tababarayaashu.

Tim Price oo ka tirsan Roosevelt iyo Jeremy Johnson oo ka tirsan Lincoln ayaa coddeeyay in ay yihiin Wada-tabarayaasha Sanadka. Fiiri [liiska buuxa ee xulashada horyaalka oo dhan](#).

La taliyaha Sellwood oo la sharfay: La taliyaha Dugsiga Dhexe ee Sellwood ee Christy Wheeler ayay Ururka La taliyayaasha ee Dugsiyada Oregon u doorteen in ay noqoto La taliyaha Sanadka ee Dugsiyada Oregon. Maamuusida waxaa laga soo xushay barnaamijada la talinta dugsiga ee ka jira Oregon taasi oo ah heerarka dugsiyada hoose, dhexe iyo sare.

Wheeler waxay heli doontaa abaalmarin dhan \$1,000 waxayna u tartami doonaa La taliyaha Sanadka ee Dugsiyada Qaranka. OSCA ayaa bixin doonta safarkeeda iyo diiwaangelinteeda la xiriirta dhacdada qaranka ee Ururka La taliyayaasha ee Dugsiyada Maraykanka oo Janaayo 30-Febraayo 1 ka soconaysa Washington, D.C.